

Sida waafaqsan Xeerka Horumarinta Waxbarashada Dadka Qaba Laxaad La'aanta (IDEIA), caruurta qabta laxaad la'aanta korriinka iyo garaadka waxay xaq ugu leeyihiin noocya badan oo adeegyo kala duwan ah dego dugsiyeedka min maalintay dhashaan ilaa da'da 21. Tallaabada ugu horraysa ee lagu heli karo adeegyadaas waa kobcinta qorshe.

Qorshaha hore ee loo adeegsado ardayda da'da 3 iyo ka-weyn waa Qorshaha Waxbarashada ee Qof-ahaaneed (IEP). IEP wuxu keliya culayska saaraa baahiyaha waxbarasho ee ilmaha. Kooxda IEP, oo ay ku jiraan ilmaha waalidkiisu, ayaa ka mas'uula kobcinta IEP. Degmo dugsiyeedka ayaa ka mas'uula ku hirgelinta IEP jawiga ugu cidhiidhiga yar. Si uu ugu qalmo, ilmuhu waa inuu qabaa laxaad la'aan, u baahan helitaanka waxbarasho gaara iyo adeegyo la xiriira oola helaa inuu u qalmo oo hoos yimaad 13 tilmaamood ee soo socda::

- Laxaad La'aan Korriinka Garashada
- Dhago La'aan Ama Dhago Culays
- Hadalka ama Afka oo Qaba
- Arag Dhimman
- Dhibaato Xagga Niyadda ama Edebta
- Laxaad Dhimman
- Xanuunka "Autism Spectrum:
- Nabar Halisa ee Maskaxda
- Laxaad La'aad Cafimaad oo Kale
- Laxaad La'aad Gaara Xagga Waxbarashada
- Indho La'aan – Dhago La'aan
- Dhinaan Ba'aan oo Dhawra
- Korritaan Daahay (ilaa da'da 7)

Waalidku waa in ay helaan fursad ay si firfircoon uga qayb-qaataan kobcinta IEP. Marka hore IEP lama kobcin karo haddii aan laga helin waalidka ogolaansho la wargeliyey. Waxa raaca IEP-ga hore, dugsiyada ayaa sii wadi kara hirgelinta isbeddelada IEP kadib 14 maalmood haddii aanay waalidku qoraal ahaan ku diidin. Marka ay waalidku kusoo jawaabi waayaan 14 maalmood, jawaab la'aantoodu waxay u taagan tahay ogolaansho. IEP-yada waa in dib loo qoraa ugu yaraan sannad walba.

Xeerka Federaalka ayaa bixinaya rabitaanada kobcinta IEP, laakiin gobolada iyo degmo dugsiyeedyada ayaa haysta dabacsanaan dhawra oo ay ku tarjumi karaan oo ku wadi karaan xeerarka. Taas darted, waxa jira kala-duwanaansho qorshayaasha gobolada iyo degmo dugsiyeedyada kala duwan.

IEP-ga Ilmahaagu waa inuu ku fadhiiya natiijada qiimaynta oo dib loo eego sannad walba. IEP-ga waa inay ku jirto:

- Ilmahaaga heerkiiisa hadda ee waxqabad iyo baahidiisa wabarasho iyo hawlgalnimo.
- Himilooyin la qiyaasi karo oo sannadle ah iyo ujeedooyinka muddada gaaban.
- Waxbarashada gaarka iyo adeegyada la xiriira ee uu ilmahaagu heli doono.
- Isbeddelada iyo taageerada ay shaqaalaha dugsiisu siinayaan ilmahaaga.
- Sharax heerka uu, haddiiba, ilmahaagu ugala qay-galayn fasalka caadiga ardayda aan laxaadka la'ayn.
- Taariikda adeegyadu bilaabmeen, immisa jeer, meesha iyo muddada.
- Sida ilmahaaga horumarkiisa loo qiyaaso ee looga warbixiyo.
- Meelaynta waxbarasho ee ilmahaaga.

**Wixii macluumaad dheeraada ama adeegyada u-doodidda, kala-xiriir Arc Greater Twin Cities 952-920-0855 ama booqo [www.arcgreatertwincities.org](http://www.arcgreatertwincities.org).**

*Dhokomentigani ma aha talo sharciya, oo yaan sidaad loo qaadan. Taas darteed, macluumaaka halkan ku qorani ma beddeli karaan talo wax-ku-oola oo qareen. Xarunta Xeerka Laxaad La'aanta ee Minnesota waxa lagala xiriiri karaa (612) 334-5970.*